Diyaar Ahow: si aad u qaadato nafahaantaada macluumaadkan dowladu ku siisey waqtiga ku haboon una isticmaasho raacdidna sida uu yahay. Haddii aad raacdo sida wax lugugu sheegay waxaad diyaar u tahay wax lama filaan ah.  Hadda diyaar garow.

## 4 Ka qayb Qaado

diyaarinta Bulshadaada:

Markaad diyaariso naftaada iyo qoyskaaga u gudub in aad ka qayb qaadato diyaarinta bulshadaada. Ku xiran Citizen Corps oo ah kuwa ka qayb qaata diyaarinta bulshada si loo adkeeyo jiritaanka iyo nabada wadanka. Qof walba qayb buu ka qaaataa sidii magaalooyinkeena looga ilaalin lahaa wax walba oo khatar ah. Citizen Corps waa howl kar diyaariya, tababara, uguna shaqeeya bulshada tabaruc. Gal www.citizencorps.gov si aad u heshid war deeraad ah ugana qaybqaadatid shaqadooda.

## Talabixinta waxa loo baahan yahay waqtiga xaaladu jirto:

- ❒ Biyo: Hal gallon (caag) qofkiba maalintii, cabitaan iyo nadiifad
- ❒ Cunto: ugu yaraan seddex cisho cunto kugu filan oon xumaan.
- ❒ Radiyo Battary leh iyo battery dheerad ah Toosh iyo battery dheerad ah
- ❒ Sunduuqa caafimaad deg dega ah loo isticmaalo
- ❒ Firinbe:  si aad ugu yeerato caawimaad
- ❒ Shabaqa aan suntan gubin ama funaanad ka sameysan suuf, si ay kuugu nadiifiyaan hawada.
- ❒ Shukumaano quyan oo nadaafadeed
- ❒ Wrench ama qardhabo/biinso si aad ugu demised korontada
- ❒ Koonbo fure haddii alaabtaa ay ku jirto cunta gasaceysan
- ❒ Palastiga fidsan iyo ku dhejiyaha derbiga si aad ugu isticmaashid hoyga aad ku jirtid dalooladiisa.

  Bacda qashinka iyo waxa lugu xira si aad ugu isticmaasho nadaafadaada.
- ❒ Waxa qoysku u baahan yahay: sida daawada joogtada loo qaato, caanaha ilmaha, xafaayada, iyo warqadaha qoyska ee muhiimka ah.

Lsku duba ridkan caqli galka ah waxaa loogu tala galay in lugu qaado olole lugu diyaariniyo muwaadiniinta. Wixii cusub iyo talo bixintii soo kororta waxaa u baahantahay in aad gasho: www.ready.gov

WWW.HOMELANDSECURITY.OHIO.GOV

Ohio Department of Public Safety
Education • Service • Protection

Ted Strickland, Governor
Henry Guzmán, Director
William F. Vedra, Jr., Executive Director

WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV

HLS 0066 8/07



# Diyaargarowgu wuxuu Sameeyaa Macno

## Diyaar Garow Hadda

Nabadsugida Dalka
WWW.ready.gov

## Diyaargarowgu wuxuu sameeyaa macno

Sida aad ugu badbaadi kartaan agiga iyo Qoyskaaga guriga oo dab qabsado waxay ku xiranthay adinka oo qaba qaac sheegayaashaal iyo hab looga baxo guriga marka dab ka kaco iyo qayb ciidan dab damis ee taba baran. Waxaa sidoo kale run ah sidaad uga bad baadi lahay argagixiso iyo arrimo kale oo deg deg ah. Waa in aan qabno qalab iyo ogaal diyaar ah mar kasta oo deg deg amar ah dhaco meel kasta oo aan joognaba. Sida qaac sheegayaasha oo kale, u diyaar garowga lama filan waxay sameyneysaa macno.

**U diyaar garow hada.**

## 1 Diyaarso Alaabta

xaalada deg dega ah

Waa in aad u diyaar garowdaa wixi dhaca si aad u isticmaashid waxa aad haysatid ugu **yaraan saddex cesho** ama ka badan.

In kastood waxaalo badan nolosha kuu sahlayaan ka fekar marka hore biyo, cunto iyo hawo nadiifa.

**Ka fakir Laba sanduuq:** kowaad wax walba oo aad u baahan tahay waa in ay agtaada yaalaan oo diyaar kuu yihiin. Ka labaad waa in uu khafiif yahay oo aad qaadan kartid haddii aad baxsanaysid.

Waxaa u baahantahay hal caag (galoon) oo biyo cabitaan nadiif ah qofkiiba maalinti. Sanduuqyada guduhood waxa ku jira waa in ay ka mid yihiin saddex beri cunto kugu filan oo aan halaabayn sida cuntad gasacaysan, khudaarta qalalan, iyo proteinka. Haddii aad ku nooshahay cimilo qabow waa in aad qof walba u qaadatid dhar qabow iyo boorsooyinka hurdada.

Waxaa dhici karta dad xag jir ah in ay weerar hawo sumeyn ah soo qaadaan iyagoo isticmaalaya bacteri'yada aan ishu qaban oo haday jirka qasho dhibaato u gaysankarta sidaa darteed waa in aad heshid daboole **afka iyo sanka** suntaa ka celiya qof kasta oo qoyska ka mid. Alaabtaa waxaa ka mid ah laba ilaa saddex isku laab oo ah funaanado, shukumaano, fasaleetiyo, iyo shabaqa hawada wixii sun ah ka reeba. Waxaas oo dhan waxaad ka heli kartaa dukaanta qolabka lugu iibiyo. Mar walba ku dadaal in aad hubiso waxa aad sanka iyo afka saarayso ee aad ku neefsaneysid in ay la eg yihiin intii loogu tala galay si hawada aad qaadaneysid u soo dhex marto, Ilmahana sidoo kale ka hubi in ay la eg yihiin.

Waxaa kale oo aad ku daraysaa waxa aad diyaarsaneysid bacda qashinka lugu shubo ama plastik fidsan oo adag iyo wixii lugula dhejin lahaa dariishadaha si loo abuuro ma gubiye sumeed haddii ay ka timaado sun Qatar ah banaanka.

## 2 Samee diyaar Garow:

Maxaad sameyn Haddii deg deg dhaco?

Hoaray ugu diyaargarow wixi aad sameyn lahayd haddii dhib dhaco. U diyaar garow in aad qiyaasto xaalada. Isticmaal caqli si aad u hubiso wixii aad haysato una badbaadiso naftaada iyo dadkaaga aad jeceshay.

**Diyaari sidaad qoyskaaga u xiriirin lahay:** waxaa laga yaabaa in aan qoyskaagu wada joogin marka dhibaatadu dhacdo sidaa owgeed sii diyaari sidii aad yeeli lahayd markay ku qabsato xaalado kala gedisan. **Ku tala gal markii dhibaato dhacdo halkii adiga iyo qoyskaaguba aad isku meel u wici lahaydeen, ama E-mail ugu dirilahaydeen, sida asaxaabta ama dad kale oo idinku dhow qoys ahan.** Waxaa sahalan in qof kasta oo qoyska ka mid ah uu waco meel ka baxsan halka dhibku ka dhacay meel kasta uu joogaba. Waa in aad hubiso in qof kasta haysto sarif ama card phone hore loo bixiyey si qof kasta ula xiriiro halkii loogu tala galay. Waa in aad dhul qaadato haddii uu kuu bixi waayo telefoonku waxaa laga yaabaa in isgaarsiinta oo dhan xuntahay.

Go'aanka muhiimka ee aad gaaraysid in aad jooto iyo in aad cararto wuxuu ku xiranyahay dabeecada iyo xaalada jirta. Waa in aad ku tala gasho una diyaar garowdo labada xaaladoodba. Waa in aad isticmaasho caqli iyo cilmiga aad halkan ka baraneyso haddii khatar deg dega jirto. **Waxaad dhagaysataa radiyouga fiirsana telefishinka sidaad u ogaato xaalada jirta**

**Sameeyso hab aad ku tala gasho joogitaan:** waxaa jira xaalado aad dooneysid in aad joogtid markaa waxaa loo baahan yahay in aad abuurto ma gudbiye idiin dhexeeya adiga iyo sumeeyaha hawo ee dibada ka imaanaya, Shaqadaa iyada ah ee aad hawa tiraysid guriga aadna rabitid in aad joogtid ayaa laga yaabaa in ay tahay u dagaalanka jiritaanka noloshaada. **Haddii aad ku aragto hawada qashin badan ama dowlada jirta ay tira hawadu waa sumeysan tahay waa in aad gashaa hoyga gabashada oo aad ka dhowrto hawa soo gasha dariishadaha, albaabada iyo meel kasta oo hawo ka soo geli karto adigoo isticmaalaya plastiga fidsan.** Plastiga aad isticmaalaysid waa in uu xoogaa qadar ah ka weyn yahay halka aad ku aadineysid si aad si siman gedaarka ugula fidisid dhejiyaha.

Waxaad isticmaashaa wixii warar ah si aad u qadariso xaalada jirta. Haddii aad ku aragto hawada qashin badan ama dowladu jirta ay tira hawadu waa sumeysan tahay adiga iyo qoyskaaguba waa in aad gashaan hoyga gabashada oo aad ka dhowrto hawada dibada in ay soo gasho meel kasta oo ay ka gelikartoba.

**Sameeye sidii aad ku baxsan lahayd:** waxaad hore ugu sii diyaarsataa sidi aad qoyskaaga isugu keeni lahayd iyo halki aad sii aadi lahayd. Dooro meelo badan oo jihooyin kala gedisan leh si aad u hesho xaalad kuu saamaxda ka doorasho. Haddii aad baabuur/gaari leedahay waa in mar walba haanta/tangigu laba qaybood qaybi buuxdaa. **Waa in aad isbartaa wadooyin iyo wax kale oo looga safrikaro halka** aad ku nooshay. Haddii aadan xitaa gaari haysan waa in aad diyaarisaa sidii aad ku bixilahayd. Qaado wixii aad u diyaarsatahay xaalad deg deg ah haddii aadan rumeysneyn in aysan sumooben, markaana xir albaabada. Hakategin xayawaanka ogowna lama ogola hoyga dadka ka dhexeeya. Haddii aad gaari wadatid aadna aminsantahay in hawadu sumeysantahay waa in aad dariishadaha gaariga xirtaa, qaboojiyaha ama kululeeyahay demisaa, dhageysatana radiyaha,

**Waa in aad ogaataa qaabka xalada deg degeed ee iskoolka iyo shaqada:** ka fakar meelaha qoyskaagu joogo sida shaqada, iskoolka iyo meelaha kaleba. KaLa hadal ilmahaaga iskoolkooda iyo shaqadaadaba sida ya u diyaarsadeen xaaladaha deg dega ah. Ogow sida ay ula xiriirayaan qoysaska ilmaha marka xaalad deg deg ah dhacdo. Haddii luugu shaqeeyo hubi in aad u diyaar tahay xaaladaha deg degaa una diyaari shaqaalahaaga xaaladahaas iyga ah. Waxaa maco weyn sameeya isla shaqeynta bulshada isla nool markii xaalad deg dega dhacdo. **Kala hadal dariskaaga sidii aad u wada sheyn laheydeen.**

## 3 War Gal U Noqo

waxaa dhicidoona:

Waxyaalaha aad sameyn kartid si aad ugu diyaargarowdo wax lama filaan ah, waxaa ka mid ah adigoo diyaarsada sidii aad u xiriirin lahay qoyskaaga iskuguna aruursan lahayd waxaad u baahantahay markii ay dhacaan dhibaatada dabiiciga ah iyo midka dadku sameeyo. Si kastaba ha ahaatee waxaa wax weyn u dhexeeyaan go'aanka aad qaadaneysid iyo waxa aad sameynaysid marka ay dhacaan dhibaatooyinka dadka xag jirka ah sameeyaan sida sumeyenta Biologiga, chemikada, qaraxyada, qumbula-duriyaha, iyo shucaaca. Haddii aad bilowdo barashada arrintan gaarka ah sida loola tacaalo waxaad u **diyaarineysaa naftaada** waxaad ku dhaqaaqi lahayd haddii xaaladaa deg-deg ah dhacdo. Waxaad gashaa shabakada www.ready.gov si aad u fahamto intaan sheegnay wax ka badan oo ku saabsan arrimahan iyaga ah ama wac telefoonka 1-800-237-3239 si aad u hesho maqaalo aad akhrisato oo dheeraad ah aanana waxba ku kalifin/lacag aheyn.